

Somaliska

Faktablad för arbetsökande –
Särskilt introduktions- och uppföljningsstöd
(SIUS)

2012-11

Taageerada gogoldhigga iyo tixraaca gaarka ah [Särskilt introduktions- och uppföljningsstöd] (SIUS)

Haddii aad leedahay awood-darrada shaqaysashada, taasoo itaaldarro u sabab ah, waxaad markii shaqo cusub lagugu qoraayo heli kartaa taageero iyo caawinaad. Teeda kale, xilliga shaqo ku qorida waxaad heli kartaa taageero. Taageerada waxaa ku siinaayo la taliyaha-SIUS, kaasoo karti-xirfadeed gaar ah u leh hab-dhiska gogoldhigga. Taageerada waxaad heli kartaa haddii aad tababarka shaqada iwm aad ku dhaqaaqdo.

Taageeradee la taliyaha-SIUS laga helaa?

La taliyaha-SIUS wuxuu ka caawini karaa gogoldhiggida goobta shaqada. La taliyehawuxuu isku dabarida goobta shaqada iyo qorsheynta qaabka gogoldhiggida, wuxuuna mas'uul ka yahay inaad hesho taageerada aad ku wada heshiiseen. Taasoo macnaheeda noqon karto in adiga iyo la taliyaha-SIUS aad mudo wadashaqaysaan. Markaas kaddib taageerada hoos ayaa kolba loo dhigi doonaa illaa gebi ahaan laga ciribtiro markii hawlahaaga aad hab madaxbannaan u qabsan karto.

Taageerada ma heli karaa?

Haddii shaqolaawe aad tahay waxaad la taliyaha SIUS ka heli kartaataageerada gogoldhigga iyo tixraaca gaarka oona

- itaaldarro awgeed ku hayso awood-darrada shaqaysashada
- markii shaqo lagugu qorayo aad u baahan tahay taageero gaar ah.

Illaa intee ayaa taageerada heli karaa?

Taageerada waxay u qaybsan tahay laba: mid waa taageerada gogoldhigga, tan kalena waa taageerada tixraaca. Taageerada gogoldhigga waxaad heli kartaa mudo lex bilood ah. Taageerada tixraaca waxaad heli kartaa ugu yaraan mudo hal sanno ah, taasoo laga soo bilaabo maalinta shaqada lagugu qoray.

Gunnada iyo caymisyada aan leeyahay waa kuwee?

Xilliga gogoldhigga waxaa lagu siin doona isla gunnada aad qaadan jirtay markii shaqo-doone aad ahaan jirtay.

Xilliga gogoldhigga laguma xisaabiyo sida qof shaqo ku qoran, laakinse sida hadba ku xusan qodobada Xeerka deegaanka shaqada waxaa lagula dhaqmayaa sidii qof shaqo ku qoran. Taasoo macnaheeda tahay in loo shaqeeyaha u mas'uul ka yahay in shaqada aad ku gudato hab sugan, iyo in aad haysato qalabyada shilalka looga badbaado oo adiga ku gaar ah, waahaddii aad u baahan tahay. Taageerada gogoldhigga loo shaqeeyaha uma keeno kharash mushahar. Waxaad ku caymisan tahay dhaawaca shaqada iyo geerida. Qaranka ayaa bixin karo magdhowga dhaawacyada aad adiga sababto.

Sidee xilka loo qaybsaday?

Xarunta Shaqada ayaa go'aan ka gaarto taageerada gogoldhigga iyo tixraaca gaarka ah iyo taageerada tixraaca. La taliyaha-SIUS wuxuu markaas kaddib la xiriirayaa loo shaqeeyaha oo kaddib kala xaajoonayaa shaqo ku qorid. Waxaan wadajir u eegaynna hawlaha kugu habboo oo aad qaban karto, iyo qiimaynta nooca taageero adiga kugu habboon ee goobta shaqada. Goorta taasii ay dhamaato waxaa heshiis loola gelayaa adiga, loo shaqeeyaha iyo la taliyaha-SIUS. Waxaa ku qoran hab-dhiska gogoldhiggida iyo heerkiisa.

Nidaamyada

Xeer-maamuleedka (SFS 2000:630) ku saabsan waxkaqabadyada gaarka ah ee loogu talagalay dadyoowga qaarkood oo leh itaaldarro iyo awooda shaqaysashada ee hooseeyso.

Xeer-maamuleedka (SFS 200:628) ku saabsan dhaqdhaqaaqa siyaasadda suuqa shaqada

Nagala soo xiriir 0771-416 416 haddii arrintaan aad xiisaynayso ama aad doonayso warbixin dheeraad ah. Waxaad kaloo booqan kartaa Xarunta shaqada kugu dhow ama shabakadda internetka arbetsformedlingen.se.